

MAXAA KA SOCDA BUUNDADA GALBEEDKA SEATTLE?

WAXEY KU SOCOTAA IN DIB LOO FURO BARTAMAHA 2022





BUUNDADA SARE EE GALBEEDKA SEATTLE WAXEY KU SOCOTAA IN DIB LOO FURO BARTAMAHA 2022

Waad ku mahadsan tihii dulqaadkiina iyo adkeysigiina. Waan la soconnaa in buundada xinaashaheeda ay abuureyso caqabado waaweyn. Shaqo adag ayaan wadnaa. Dayactirkii hore ee lagu xasiliinayey buundada way dhammeystirantay dayactirka ugu dambeeyana wuxuu bilaabanayaa deyrta. Wax badan halkan kaga ogow dayactirka buundada sare:

bit.ly/wsbridgerepair

ISKAAN GAREE SI AAD WAX BADAN U OGAATO!



SU'AALO AMA FAALLOOYIN?

Phone: (206) 400-7511

Email: WestSeattleBridge@seattle.gov

Isu diiwaan geli helidda wararka: seattle.gov/westseattlebridge



Seattle
Department of
Transportation

SIYAABAHA LOO SOCDAALI KARO IYO SIDA AAD GACAN UGA GEYSAN KARTO

Iyadoo la qaaday xanibaaddi COVID, waddooyinkii waxey noqonayaan mashquul. Waxanu ka shaqeyneynaa inaan dhiso mashaariic dhiir-gelinaya badqabka oo yareynaya saameynta baabuurta ku leeyihiin xaafadaha.

Adiga xittaa waad caawin kartaa! **Haddii aad awooddo, iska daa wadidda.** Baaskiilee, soco, ruclee, mooteey, bas ama feeri raac, ku biir faanka la wada raaco, ama xaafadda iska joog. Wax ka badan ka ogow siyaabaha kale eed u socdaali karto: bit.ly/traveloptions206

HA KU DUL WADIN BUUNDADA SPOKANE ST SWING BRIDGE IN LAGUU OGGOLAADO MOOYEE

Buundada hoose way ka xiran tahay baabuurta maalmaha toddobaadka 8da subax ilaa 9ka galab iyo dhammaadka toddobaadka 8da subax ilaa 9ka fiidkii. **Baabuurta aan loo oggoleyn waxey heli doonaan 75 doolar oo tikid ah.** Eeg haddaad u qalanto inaad ku dul wadi karto buundada hoose ama halkan kaga dalbo maritaanka: bit.ly/lowbridgeaccess. Buundada hoose way u furan tahay dhammaan kuwa soconaya, baaskiileynaya, ama rucleynaya.



SU'AALO AMA FAALLOOYIN?

Phone: (206) 400-7511

Email: WestSeattleBridge@seattle.gov

Isu diiwaan geli helidda wararka: seattle.gov/westseattlebridge



Seattle
Department of
Transportation